


The Somali Women's Scholarship Program



Kobcinta waxbarashada gabdhaha waxay saldhig u tahay dhismaha bulsho u hoggaansan horumarka.

Haddii aad tahay gabar sabool ah oo duruufaha nolosha ay u saamixi waayeen inaad jaamacad aaddo ka faa'iideyso barnaamijka Somali Women's Scholarship Program kaas oo loogu talo galay gabdhaha Soomaliyeed oo dalkii ku nool, natiijo wax ku ool ah ka keenay waxbarashada dugsiya sare, saboolnimo ku nool, doonayana inay aadaan jaamacad. Gabadhii ku guuleysata waxaa loo qoondeeyey \$1000 doolar sanadkii taas oo kabi doonta qarashka jamacadda iyo nolol maalmeedkeeda.

Gabdhaha fursadda heli doona waa inay u hoggaansanaadaan ayna yeeshaan xil qaadis si ay u mideeyaan una abaabulaan horumar iyo kala danbayna u gaarsiiyaan bulshadadooda. Tartanka lagu soo xulayo gabdhaha deeqda heli doona waxaa ugu danbayn la soo gudbin karaa bisha Juun 25-keeda 2011 waxaana gabdhaha ku guuleystay la soo wargalin doonaa bisha July 15keeda 2011.

Wixii faahfaahin ah waxaad kala xiriiri kartaa:
info@globalenrichmentfoundation.com ama
aurelia@globalenrichmentfoundation.com

